Maktabada Telegramka @Somalibooks

Qisadii malaayiinta kaga oohisey

QAYS IYO LEYLA

Turjumaadii iyo Waliba Heesihii C.Muumin

qisadani waatii ugu layaabka badnayn ee dunida kadhacday , malaayiin mucaashaqiina ayay kaga oohisey qays iyo leyla buuraha iyo badaha iyo webiyaduba waaka markhaati jacaylkooda , waxay dhacday qisadani xilligi boqorkii **cabdil malik binu marwaan** ee dawladdii **umawiyiinta**

waa mucaashaqii qays binu mulawax binu masaaxim binu cadas , waxuu dhashay **440** kii hijriga waxa uu kusoo barbaaray maskax badnaan iyo fariidnimo , aabbihii wuxuu ka dhaxlay gabayga carabta iyo sheekooyinkoodii waxa uu aabbihii baray garashada xiddigaha iyo guuraha habeenkii

waa saaxiibadiisii **leyla** bintu mahdi binu sacad binu mahdi binu rabiica , waxay dhalatay **444** kii hijriga oo afar sannadood ayaa qays kaweynaa , leyla waxay lasoo barbaartay qurux badnaan iyo laba indhood oo wax sixraaya , dhererkeeda iyo jidhkeeduna wuu isu dheeli tirraa waxay udhalatay caddaan iyo qurux

qays iyo leyla waxay ahaayeen laba carruura oo ay isu keentay qaraabadu oo xagga nasabka waxay ahaayeen ilmaâadeer adhiga ayay urraaci jireen ehelkooda sidaa kamaysan suulin ilaa ay waaweynaadeen oo leyla ka xijaabatey oo ka hagoogatey qays sida islaamku farayo , taasoo kicisay jacaylkii iyo uhilawgii qays uu uqabay leyla , isagoo arki waayey yaraantiisii wuxuu arki jirey layla oo aan hagoognayn , markaas ayuu isagoo calaacalaaya sidatan yidhi

“leylay ma waad

weynaatayoo

Maktabada Telegramka @Somalibooks

waadigan xijaab

isku waabayee

waafyaha jidhkiyo

waaxyaha qurxoon

waad iga deddoo

waayaha dhulkaan

wada joognaybaan

weli sii arkaa

waqtigii tegiyo

waagaan yarayn

allow yaa wareeg

dibu waaciyoo

inageeya waab

iyo waadigii

webiyada badnaa “



markii laôgaadey labadooda jacaylka udhaxeeya waa lakala fogeeyey oo qays ayaa loo diidey ina uu yimaado leyla agteeda , haddana iyada oo carabtu ceeb uôaqoon inay wiil iyo gabadh sheeko dhex marto , qays waxa soo food saaray murugo oo waxa saameeyey fogaanshaha leyla iyo jacaylka uu uqabo , waxa uu bilaabay ina uu ka fogaado ehelkiisii iyo wadankii oo waxa uu lasaaxiibay buurihii iyo kobihii ay markay yaraayeen adhiga ku raaci jireen , isagoo xussaya maalmahay soo korayeen ee carruurta ahaayeen ayuu sidan yidhi

“leylay badhaadhaha

baradaad ku dhalatiyo

beledkii samaayee

berigaynu joognee

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

aan wada barbaarnee

kaa bogan lahaayee

kaymaha bannaaniyo

aan baylah joognaan

waxba yaan baroortiyo

bohol yowga iiyimi

nafta aan la biimayn”

qays waxa uu ku dhaartay inaanu deynayn leyla oo uû man doono, taas oo sababtay in leyla iyo ehelkoodii ka guuraan dhulkii ay deganaayeen , si aanu meella uga soo gaadhin qays , maalinba maalinta kaddanbaysa xaaladdu way sii xumaani qaysna waxa uu ku wareegayaa buurtii ay adhiga ku raaci jireen ee la odhan jirey **tawbaad** iyo togaggii yaraantoodii ay ku ciyaari jireen , waxa aanu yidhi sidatan

“arlo kaa fogbaan

ku asqoobayoo

maalmuhu anay

ii ooyayaan

hogagbaan ardaa

ka agjeexdayoo

oontii kago’ay

aradkaynu beri

ku ayaayurnaan

ku agmeerayaa”



layla waxay maqashay dhibaatada iyo werwerka haysta inaadeerkeed markaas ayay uû adkaysan weydey oo kaxumaatay aabbeheedna waxa uu kaxanaaqay heesaha iyo gabayada qays leyla usoo tirinaayo ee ku faafaaya bulashada, waxa uu uga

Maktabada Telegramka @Somalibooks

dhaartay oo kaxarrimay ina uu leyla arko , tani waa leyla oo doonaysa inay qays dhibaatada laqaybsato waxa aanay tidhi

“saxarahaad dhex joogtiyo

iyo soomal haadkiyo

siigada dhacaysiyo

seeraha fogaadiyo

buuraha salkoodiyo

sabarkiyo bannaanada

mar masoo siyaartaa?

saxariirka caashaqu

haynoo sinnaadoo

aan soo salaamee”

qays iyo leyla waa labo ruux oo isjeclaada kuwii isugu jacaylka badnaa ee soo maray dunida ,labadaa qalbi hadday kulmi lahaayeen badaha iyo webiyada iyo buuruha intuba way uhanbal yaynlahaayeen kalluunka badda ku jiraana sacabka ayuu utumi lahaa , laakiin sidatan ayaa dhacday

leyla waxa guursadey nin layidhaahdo **werdi** kadib markii aabbeheed ku khasbay , taasina waxay geeri ku noqotay qays oo markii uu maqlayba saxarihii iyo buurihii ay lawareegeen xaaladdiisa caafimaadna noqotay miday kaddaaleen dhakhaatiirtu , qays aabihii ayaa maalin ugu yimi god isaga oo hurda waxa aanu kadalbay ina uu urraaco guryihii iyo meeshii walaaladii joogeen , qays markii uu dib ullaabtay aad ayaa loo canaantay iyada oo qof kastaa ku leeyahay ,maxaad naftaada uhalaagaysaa gabadh kale maad dunidan kaweydey. , iyada oo gabdhihii carabta ugu qurux badnaa loo soo bandhigayo taasna wuu ka indha saabtay qays ,oo waa halka ay iska shabbahaan cilmi boodhari , qays waxa uu goâansaday inuu dib ugu laabto dhulkii riyada

qays ma uu quusan weli waayo leyla dunida way joogtaa dayaxana way laddaawtaa xidigahana way latirisaa , sidaas oo ay tahay qays wax kastaa waa ku liddi talo kasta oo uu daba ordaa waxay kasii muuqataa hal fadhigeed habeenka iyo maalintuna waay ukala danbeeyaan , afarta jihona dabaylaha ayaa uga yimaada , waxa aanu yidhi isagoo kacabanaya leyla sida looga fogeeyey

“dadka oo idilbaa

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks



iga kaa asturoo

ma adduunka dhanbaa

iga hiilinayoo

indhihii isixraan

aragooda jeclaa

ma arkee leylay

ifka may joogaan

ma illaawi karee”

labadaas ruux aad ayay uâadkaatay inay kulmaan ,keliya waxa wararka ukala qaadi jirey safarrada ukala gooshaya shaam iyo jasiiradda carabta , maalinba maalinta kaddanbaysa qays waxa uu kasii baxayaa saaxada nolosha waxana hadheeyey werwer , walaac iyo walbahaar . leylina mamoogana saaxiibkeed waxa haysta , habeen habeenada kamida ayay jaariyadeedii loogu yeedhi jirey **marjaan** ay waraaq ugu soo dhiibtey taas oo kabbaadh baadhaysa dooxooyinka ó waadiyada iyo lama degaanka . allahayow waqtigu muxuu isbedelayaa , shalay qays iyo leyli waxay kuwada ciyaari jireen bannaanada iyo guryohooda xilligay caruurta ahaayeen , maantana waxa udhexeeya webiyadii murugada , oo midwaliba dacalkiisa kacabayaa, hadday isku dayaan inay isusoo gudbaanna , waxa qaadanaaya mawjadaha bilaa naxariista ah **.** marjaan weli way daydayeysaa qays oo mahelin**.**

qays waxa uu joogaa buur dusheed , oo waxa bannaankii fidsanaa uga soo muuqday hummaag, hiimsa hiimsahana waxa uu sawirtay leyla oo doonaysa , hasayeeshee bidhaantii way soo socotay ilaa ay usoo dhowaatey , waa qof dumar ah !! aad ayaa uu ufarxay saa waaba jaariyaddii ***marjaan*** markaasuu dhawaaqay oo ku yidhi**”** aaway xaggay martay óxaalkeedu sidee ayuu ahaa leyla bal kawarran**”** markaas ayay warqaddii udhiibtey oo kutidhiòleyla waxay kaaga baqaysaa inaad kudhibaatootid jacaylkeeda waxa kale oo ay ku soo tidhiò ***hablaha dunida jooga maxaan kaga duwanahay oo aad sidan iigu jeclaatay ?***

waraaqda leyla waxay ugu calaacalaysaa qays iyada oo leh **“ adiga ayaa xaq uleh inaad nolosha *ila wadaagtid waxa aniga iguursaday nin aan naxariis lahayn oo indhaha igu guba waxaan nahay laba isneceb oo caw ku wada caweeya*”** markaas ayaa uu qays xanaaqay oo sidatan yidhi

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

“aduunyadan carrawdee

casar liiqa joogtee

ciiradu kuxidhatee

laysugu cadhoodee

lamaanaha is caashaqay

ciil looga aarsaday

cirkuba dhowaanahan

daruuraha macuriyoo

badda caari mooyee

cayn kaleba loowaa

dayaxii caddaanwaa

xiddigii cadceedsade

laxihiina caad gale

caawana habeenkii

cidla maygu soogalay

leylina ma cawbay

werdi kula cawaysaa ?”



qays waxay kaguureen dhulkii murugada badnaa , iyada oo ladoonayo ina uu sidan dhaamo oo waxa ay aadeen magaaladii sharafta badnayd ee **maka almukarrama** iyada oo kacbada looga soo ducaynayo, sidaas oo ay tahay qays hadana kama uu bogsan dareenkii leyla ,maalin ayaa waxa soo dul maray shibiro ujahaysan dhulkii leyli ku noolayd markaas ayuu isaga oo salaan ufaraya sidatan yidhi

“shinbiryohow sarreeyee

duulaaya samadee

soohdimaha dulmarayee

siduu doono yeelee

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

hadba meel siyaartaan

daalayn sideydee

tii aan sugaayee

qalbigayga siiyiyo

salaan leyla gaadhsiiò

leyla maxaa udanbeeyey ?

leyla waxa canaantay , hablihii saaxiibada ay ahaayeen , iyaga oo ku leh **“ qays ballantii ayaad kaga baxday aad dhigateen berigaad yar-yaraydeen”** leylina waxay ku doodaysaa , inaanu qays keligii jacaylku ugaar ahayn ee leyliba la dareemayso dhibaatada , waayo **haween kuba** waxay kayimaadeen feedhii **nabiyullaahi aadan , korkiisa nabad gelyo ha ahaatee** leylina waxay leedahay

“dhulkuu joogo qaysbaan

aniguna jiraayoo

niyaddiyo jidhkiibaa

lala kala jiciirtoo

midba jiha fogaatuu

waayaha la joogaa

jararbaa iteedoo

lagu jaray dhexdeennoo

jacayl xaasid baa jira

dadka kala jaxaasoo

midba jeel ku oodoo

jawi kala fogaadiyo

midba jiha kutuuroo

Maktabada Telegramka @Somalibooks

jugta gaadhey beerkaa

jinni igu abuurtoo

caashaq lala jibboodiyo

jirro laygu eegana

uma joogi karayee

dunidii ka jeestoo

lay-jeex dhulkiiyoo

inaan iilka jiifsado

aan dhigo jilbaa ciid

anigaa jeclaystee

jidka aad lugaysiyo

jeexaad wareegtiyo

arligaad jibaaxdiyo

jabad kaad kunnooshahay

marka qori ku jeexaan

anna jidhidhicoodaa

haddaan aadan jiidhkiyo

jaansaarka feedhaha

loo jeexin xaawoo

la jirsiin nafteedana

haween duni ma joogeen

dumar lama jalleeceen

qurux looma jeeleen

jacayl lalama heeseen

dhalinyaro is jamatiyo

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

ma jireen lammaanuhu”

Lela waxa soo food saaray hammi iyo walaac oo waxay kadaashey qays uyeedhidiisa , markii ay deynweydey hadal hayntii qays ayaa ninkeedii kuxanaaqay oo dhirbaaxo xanuun badan kajaray wejigeedii dayaxa uõeekaa oo saddexdii dalqadoodna urraaciyey ,intay soo carartay ayay gurigoodii ciirsi moodey ehelkeediina habeen iyo maalinba wuu garaacay , soddon maalmood afkeedaa wax may saarin oo aan ka ahayn caano hal laga lisay oo ay halmar kabbatoò ilaa ay kasoo jeesteen indhaheedii buluuga ahaa aakhiro ee indha kuusha rabbaaniga ah ay marsanayd ,

qays waxa uu maqlay in leyla sixun loo garaacay markaas ayuu udul qaadan waayey oo yidhi

“halkay kaa jebsheen

anigana jidhkii

jeex jeexmayoo

jirradaad qabtaa

anna igu jirtaan

la jiciirtayoo

leylay jidhkii

ani aan jeclaa

jeedalkii ladhacay

allow yaanu jirin

jooginna aduun”

leyli waxay aaddey allihii abuuray xagiisa oo way xijaabatey markaas ayaa inta lammaydhay laõaasayò qays noloshiisii halkay ku danbaysey ? markii loosheegay geeridii leyla qays dunida way uga dhammaatay rajaduu kalahaa , oo isaga iyo walaashiisii jeclayd ee **hinda** waxa ay kadul ooyeen qabrigii leyla

qays waxa uu ku laabtay guryihii ay ku noolaan jirtey leyli ee ay ku dhimatay siõuu uddaawado calaamadihii iyo raadadkii ay kaga tagtay dhulkaas . guryahaas oo madhan waxa sii yaalla tiirarkii iyo meelihii ay hadhsan jirtey oo keliya ó halkaas ayuu ku wareegi jirey iyo hareeraheeda , intaa wixii

Maktabada Telegramka @Somalibooks

kadanbeeyey qays aduunyadii aadka ukala fogayd ayaa afka kusoo kala qaaday , markaas ayuu yidhi isaga oo leyla iilka farriin ugu diraya sidatan

“leylaay aduunyadu

waa boos luggooyoo

labadii isdoortaa

lagu kala fogeeyaa

lebi weeye dheeroo

qofba laan kahaystoo

lulayaan dabayluhu

dadka laba lillaahiya

isu laab fayowbaa

subax kala lugeeyoo

lumiyaan dabayluhu

ruux ruux la,aantii

lediwaayey maankii

leylkii istaagoo

cidla lamanlegdoodoo

dhibka lala ogaynoo

libtu diiddey badanaa

leylay abuurtiyo

markii lagu bilaabaa

looxii maxfuudkana

lagu qoray wedkaagee”

Maktabada Telegramka @Somalibooks

dhanbaalkii leyla waa uu gaadhey iyada oo ay siddo saxan saxada roobku, subax uu mayaygu daâayo, markaas ayay usoo jawaabtey qays iyada oo kunool caalamka qarsoon kana waraysanaysa xaaladdiisa iyo halkuu ku noolyahay , sidatan ayaanay tidhi

“iilkaan dugsadayoo

dalalawsin dheerbaa

iga kaa dedaayee

dunidii majoogtaa ?

doogiyo tigaadiyo

daruuraha hillaaciyo

dayax ooga joogiyo

maku daawataa qurux ?

dalka sow hablii kacay

sacabkiyo durbaanada

kuma daba garaacaan

diiwaanka maad gelin?

Kolley kii l’dduudiyey

Dawo looma helayee

Samir iyo dulqaad badi

Duni daayin maahee”

qays waxa uu dareemay dabayshii siddey jawaabtii leyla xilli barqo ah oo gugu curanayo daruuruhuna ay sidaan biyaha , markaas ayuu isaguna noloshuu kujiro iyo cidlooyinka uu kunoolyahay utebinayaa kana cod sanayaa marûuun inay dunida ku soo laabato taas oo aan suurta gal ahayn hasayeeshee murugadu ka keentay

“ka dheeri dadkii idhalay

dhulkii ka fogaadayoo

cidlaan dhalan dhoolayaa

Maktabada Telegramka @Somalibooks

dhirtiibaa ila hadlay

dhawaaqa dabaylahaan

dhexdood dheeldheeliyaa

ugaadhbaan dhawrayaa

dugaag u'dhowaanayaa

leylaay ii dhega noglow

kafayd dhoobada indhaa

dadkuba waa dhimanayaa

mar'uun dhugo caalamkii

dushiisaan dhaawac ahay

dhanbaal baan kuu wadaa

dhowaan waan deynayaa

aduunyo dhibaatadeed

qabriga dhinac iibannay

dhabanka aan wada dhignee"



qof dhintay dunida dib uguma soolaabto qaysna waxa uu usilcayaa leyla oo markay caalmaka joogteyba ay ku adkayd inuu helo , leyli dunida way kahawl yaraysatay waxa aanay ugusoo jawaabtey sidatan iyada oo usoo hanbal yaynaysa

"hoosbaan jiraa

iilkaan hurdaa

hawlaha aduun

uma tag hayee

hagar daamadii

iyo hoohadkii

ina kala hiraa

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

hogga igu ridoo

ka haajirey ifkee

hanbal yiyo salaam

hoo iga guddoon”

qays intaa wixii kadan beeyey waxa soo wajahay kurbo iyo xanuun xad dhaaf ah. maalmihii noloshiisa ugu danbeeyey waxa uu usheegay walaashii **hinda** inaanay aduunkan dib ugu arkayn , iyaduna waxay ogaysiisey ilmaadeeradii iyo walaaladii, markaas ayaa laga baadhay buuraha dushooda iyo togagga , meeshaa waxay ku arkeen islaan daâa oo deggan , qays ayay weydiiyeen , markaasay ugu jawaab celisey ñ*maalin walba cunto ayaan dhirtaa ugeyn jirey’ shalay markii aan damcay inaan halkii cuntada udhigo waxaan ku arkay cuntadii shalay oo taalla dib ayaan isaga soo laabtay mardanbena ma arag”*

hore ayay socodkii kasii wateen ilaa ay gaadheen tog dhagxaan badan waxa aanay ku arkeen maydkiisii !! óway soo qaadeen ilaa ay guryihii dib ugu soo laabteen, qays iyo leyla waxay qabriga ukala horreeyeen oo keliya **24** habeen ,dadkii oo idil waxay maqleen dhimashdii qays , majiro mid ooyaa ama tu oydaa oo looga oohin badanyahay maalintuu qays geeriyoodey**.** kumaysan kulmin qays iyo leyla nolol raaxo leh aduunka korkiisa oo aan ka ahayn caalamkii waaraayey ee aakhiro**.** qays waxa lagu aasay leyla dhinaceeda midig oo waxa uu laseexday hurdadiisii ugu danbaysey saxiibaddii leyla , waxa uu isku qabtay labadiisii indhood kuwaas oo ay uôooyeen buurkasta iyo togwalba oo dunida kuyaallaa **.**

leyli ma oga in qays aduunkii kasoo tegey iyo caalamkii duufaanka badnaa iyo dhibaatada iyo weliba bulshadii canaanta kululayd**.** iyada oo doonaysa inay uqalbi qaboojiso siôuu ufarxo oo moodaysa inuu ifkii joogo , waxay tidhi sidatan

“maalmahan degdegayee

meeraaya dunidee

noolaha makalayee

midba meel kutuuraa

aniga imelegtee

muxubbada kalgacalbaa

mugdiyaal igelisoo

Maktabada Telegramka @Somalibooks

mawlac aan lajiifaa

midabkii aduunyada

naftu way u’muhatoo

mar inaan kullaabtaa

maankaygu doonee

qaysow majoogtaa ?”

qays hurdo ayaa laga kiciyey , inbadan oo uu dunida joogey dhaban ma uu dhigin ,si kasta oo ay ahaatoba waa inuu leyla wax ka dhaadhiciyaa oo ucaddeeyaa inuu uga dhowyahay intii hore oo ay wada joogaan daartii barwaaqada iyo nasashada , sidatan ayaanu yidhi

“dunidii majoogoo

derisbaynu nahayoo

adigaan daraadaa

noloshii uddaayoo

uga doortay aakhira

markii aad I deysee

durugtee hayaantee

inakala dabooshee

isku deyrtey ciiddiyo

iilkiyo dalluumaha

anna sow ma’aan degin

dooxooyinkii beri

adhyeheenu daaqeen

diihaanka caashaqu

dabadeed imuu helin

diiwaanka caashaqa

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

igu qore dad weynuhu”

leya iyo qays buugaag jacayl ah ayaa laga qoray, hawguba caan sanaadee buugga yaman kasoo baxay ee aan ka soo turjumey qisadan ee layidhaahdo marka ciwaankiisa latur jumo **jacaylkii waaray ,** leylina waxay tilmaamaysaa in sheekadoodii caalamka ku faaftay oo lagu maahmaaho , oo xattaa dadka is jeceli dhanbaalada isugu qoraan, waxa aanay tidhi iyada oo saaxiibkeed lahadlaysa

“qaysow aduunyada

qarnigaynu joognaa

weli laga qisoodaa

laysugu qoraa meel

qorraxdii timaadaba

qalbiyaal isjecelbaa

laysugu qushuucaa

qofba waa nafkale doon

qurux waa aduunyada

nolol laysla qaybsado”

markii muddo lajoogey ayaa waxa soo daahiray mucjiso aan hore loo arag**,** oo qays iyo leyla laba doodii qabri ayaa waxa kasoo baxay laba geed oo intay kor ubbaxeen fooda isla galay oo isku marmay **.** oo waxaabad moodaa laba qof oo hab isasiinaya !! waa maansadii abwaan **farxaan cabdi muran**

“*jacayl waa dhibaatoo*

dhacdadiisi koobaad

dhulkuu qays ku dhababee

ugu dhimatay leyluu

weli dhooban yahayoo

kama uusan dheeraan

dhiillaabi maayee

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi

Maktabada Telegramka @Somalibooks

qabriguu dhanbalayoo

intuu geliyey dhuumaha

biyo soo dhexmariyoo

dhirku beeray illkoo

dhaqso uu ukoriyoo

dhererkooda laamaha

dhudhun iyo nin joogii

markuu sare u dhaafshuu

kalgacayl ku dhaliyoo

isku soo dhoweeyoo

isku maray dhexdoodoo

dhaqankiisa weeyee

dhagartii labaadbuu

cilmi kaga dhammeeyoo

dhoobada berbera , iyo

batalaale dhigayoo

dadka dheehda yidhiyoo

wadnayaal ku dhiga, oo

dhibayoo naftoodii

ka yareeyey dhiigee”

dhammaad……

W/Q Abwaan cali muumin c/llaahi